

Press Release

Macaluul ku sii baahaysa koonfurta Somaaliya

NAYROOBI LUULYO 20, 2011 – Caddaymo muujinaya hoos u dhac ballaaran oo ku yimi helidda cunnada, nafaqo darro ba'an iyo heer dhimasho dad ayaa muujinaya in macaluul ay haatan ka jito laba meelood oo ka tirsan gobollada koonfuneed: habnololeedyada xoolo-beero dhaqata gobolka Bakool iyo gobolka Shabeellada Hoose oo idil. Xaalad bani'aadnimimo oo ba'an ayaa haatan ka jirta dhamaan gobollada kale ee Koonfurta dalka, ayadoo gurmada haatan socda uusan ku fillayn inuu kaabo baahiyada dhanka bani'aadnimimo. Natijadiina, **macaluusha ayaa la filayaa inay ku baahdo gobollada kale ee koonfurta bisha ilaa labada bilood ee soo socota.** Gurmada deg-deg ah oo aad u ballaaran ayaa loo baahan yahay taasoo ay ku badbaadayaan tobanaan kun oo nafood, laakiinse fursadaha lagu filan karo gurmada ayaa ah kuwo si aad ah u xaddidan. Qiyaasaha hore ayaa muujinaya in 3.7 milyuun oo qof oo ku nool dalka oo idil ay ku sugan yihiin xaalado aad ba'an: 3.2 milyuun oo ka mid ah dadkan tabaalaysan ayaa u baahan gurmada deg-deg ah oo lagu badbaadinayo naf (halka 2.8 milyuun ay ku nool yihiin gobollada koonfurta). Baahidan gurmada ayaa ahaan doonta mid aad u sarreysa ugu yaraan tan iyo bisha Diseembar ee 2011.

Xaaladaha bani'aadnimimo ee hadda taagan ayaa waxa sabab u ah dhawr arrimood. Roobabkii Deyrta ee Oktoobar-Diseembar oo baaqday iyo roobabkii Guga Abriil-Juun oo sababay baaba' ku yimid dalag-yadii la beertay, hoos u dhac ku yimid dalabyada shaqo-beereedka, tayada xoolaha oo hoos u dhacday, iyo dhimashada xoolaha oo aad u sara martay. Helitaanka dallaga firilayda oo hoos u dhacay iyo carqaladaha haysta tijaaradda ee sii socda waxay natijadii sare ugu kiciyeen qiimaha firilayda heerkii ugu sarreeyay ee inta la ogyahay, taasoo si aad ah u wiiqday awoodda wax iibsi ee qoysaska dhamaan habnololeedyada ka jira dalka. Bara-kac aad u ballaran iyo gurmada bani'aadnimimo oo si aad ah u xaddidan ayaa uga sii daray xaaladaha bani'aadnimimo ee hadda taagan.

Ayadoo lagu salaynayo hannaanka kala huffida xaaladaha (IPC), xaalad macaluul ayaa la aaminan yahay inay jiri karto oo keliya marka ugu yaraan 20 boqolkiiba dadka ay la kulmaan xaalad daran oo cunno helid la'aaneed ah, nafaqo darrada guudna ay gaarto 30 boqolkiiba, iyo heerka dhimashada dadka oo idil ay gaartay 2 qof 10,000-kun oo qofba maalintii.

- Qiimaha dalagyada firilayda dalka laga beero ee Koonfurta ayaa ah mid aad uga sarreeya heerka celceliska, gaarayna labo-laab ilaa saddex-laab meelaha qaar marka loo eego qiimiha siduu ahaa sanaddii 2010, ayadoo qiimuhuna uu weli sare u sii socdo. Marka la eego dhamaan habnololeedyada, qoysaska saboolka (oo gaaraya ilaa 30 boqolkiiba marka loo eego tirade guud) ayaa ah kuwo aan awoodin inay kaafiyaan baahidooda cunto lagama-maarmaanka ah ayna xaddidan tahay inay la tacaalaan cunno-yarida.
- Bishii Luulyo, FSNAU waxay qabatay 17 daraasadood oo ay ku eegaysay xaaladaha nafaqo iyo dhimasho dhamaan koonfurta Soomaaliya; 11 daraasadood ayaa natijooyinkooda la soo saaray. Xogta nafaqadarrida guud ayaa waxay ka sarraysaa 20 boqolkiiba dhamaan gobolladaasi, ayadoo weliba nafaqadarradu ay ka sarraysaa 38 boqolkiiba (nafaqadara ba'anna ay ka sarraysaa 14 boqolkiiba) 9 ka mid ah meelaha laga sameeyay 11-ka daraasadood. Heerka nafaqadarrida ee ugu sarreeya ayaa laga helay gobollada Baay, Bakool, iyo Gedo (beero-xoolo dhaqatada) halkaasoo nafaqo darrida guud ay sare u dhaaftay 50 boqolkiiba. Xarunta La-Socodka Cudurrada (CDC) ee Maraykanka ayaa xaqiijisay natijooyinkani.
- Heerka dhimashada guud ee dadka ee laba goobood ayaa ka sarraysaa heerka macaluusha (ee 2/10,000/maalin-tii) (Xoolo-beero Dhaqatada Bakool, iyo gobolka Shabeellada Hoose oo idil) ayadoo dhimashada goobaha kale ee koonfurta ay aad u sarraysaa. Heerarka dhimasho ee caruurta ka yar 5-sano ayaa ka sarraysaa 4/10,000/maalin-tiiba dhamaan gobollada koonfurta ee xogta laga hayo, taasoo gaaraysa 13-20/10,000/maalin-tiiba, gaar ahaan dhulka webiyada iyo beero-xoolo dhaqatada Shabeellada Hoose. Tobanaan kun oo dad ah ayaa geeriyooday saddexdii bilood ee la soo dhaafay.

Xaaladaha ba'an ee ka jirta koonfurta Soomaaliya ayaa la filayaa inay sii xumaato bilaha soo socda, ayadoo la filanayo in dhamaan koonfurta oo idil ay gasho xaalad macaluul ah. Arrimaha ayaa u muuqda kuwo sii xumaanaya marka la eego heerarka aad-ka u sarreeya ee nafaqo-darrida guud iyo midda aadka u ba'an iyo dhimashada caruurta ka yar 5-sano oo ay dheer tahay xaaladaha dadka reer-guuraaga oo la filayo in ay sii xumaato, qiimaha firilayda gudaha laga soo saaro oo sii kacaya, iyo wax-soo-saarka dallaga ee xilliga Guga oo ah mid ka hooseeya heerarka cel-celiska.

Xaaladda hadda taagan ayaa ka dhigan masiibada ugu ba'an ee xagga sugnaanta cuntada ee qaaradda Africa illaa iyo macaluushii 1991/92 ee Soomaaliya. Gurmada ballaaran oo taabanaya meelo badan ayaa ah mid lagama-maarmaan ah si loo baajiyo dhimasho nafeed oo hor leh iyo burbur ku dhaca habnololeedyada iyo haykalka bulshada. Sida ugu dhaqso badanna, gurmadyo lagu hormarinayo helitaan-ka cuntada lagulana tacaalayo arrimaha caafimaad/nafaqo ayaa ah kuwo si aad ah loogu baahan yahay. Xilliga dhexena, waxqabadyo dib loogu unkayo laguna xoojinayo hab-nololeedyada ayaa ah kuwo aad muhiim u ah. Tallaabooyin wax-ku-ool ah oo lagu xaqiijinayo gurmadyada kor lagu soo xusay ayay tahay in la fuliyo. Baahiyadan gurmada ayaa ahaan doona kuwo sii jiri doona ugu yaraan ilaa bisha Diseembar ee 2011.

FSNAU iyo FEWS NET waxa ay sii wadi doonaan in ay la socdaan waxyaabaha ka dhacaya dalka iyo waxa ay ku dambeyn doonaan, waxa ayna ka war bixin doonaan heerarka cunno yaraanta iyo nafaqada ee haatan taagan iyo sida ay ku dambeyn doonaan bilaha soo socda. Warbixin wadaag ah oo la shaacinayo 10-kii maalmoodba mar ayaa la billaabayaa 22-ka Luulyo. Natijooyinka ka soo baxa daraasad xilliyeedka Guga 2011 ka dib, kuwaasoo ka warramaya dalka oo dhan, ayaa la soo saari doonaa 19-ka Agoosto. Dhamaan wixii macluumaad ah arrimahan la xiriira ayaa waxa laga heli karaa www.fews.net iyo www.fsnau.org.

Technical and Managerial Support



Funding Agencies

